

## **MAS'UULIYADDA QOFKA AMAAHDA QALABKA ADEEGSIGA**

- Haddii wax iska beddelaan baahida qalabka adeegsiga: la xiriir cidda kuu qortay oo u sheeg in baahidii qalabka adeegsiga wax iska beddeleen, in loo baahan yahay in qalabka la hagaajiyo ama in uusan qalabku u shaqeynayn sidii loogu talagalay. Qofka isticmaalaya qalabku marnaba wax kama beddeli karo habka qalabku u shaqeeyo ama ma furfuri karo. Haddaba, haddii loo baahdo in wax laga beddelo habka qalabka adeegsiga u shaqeeyo, waa in lala xiriiraa ciddii qortay si ay u qiimeyso oo wax uga beddesho.
- Dayactirka qalabka adeegsiga: in si joogto loo dayactiro qalabka adeegsiga oo gaar ahaan laguugu qoray. Dayactirka waxaa caadi ahaan laga qadaa in si joogta loo sameeyo wax walba oo looga hortagayo isxoqa ku yimaada qalabka adeegsiga, sida in la nadiifiyo, in xayr la mariyo, in bateriga la cabbeeyo, in neef lagu buuxiyo iyo in haddii loo baahdo laga beddelo shaaggaga ama lugaha. Caadi ahaan waxaa dayactir lagu tirayaa samaynta kursiga curyaan banjaray.
- Dayactirka iyo adeegsiga: la xiriir meesha lagu tilmaamay marka loo baahdo in qalabka lagu sameeyo wax ka qabad iyo dayactir, iyo in qalabka oo nadiif ah la geeyo marka dayactirka lagu samaynayo.
- Xafididda qalabka adeegsiga: u xafid qalabka adeegsiga sida ku qoran qoraalka isticmaalka si uusan ugu xumaan wax ka badan ixoqa caadiga ah.
- Alaabta isticmaalka: adigaa la baxaya kharashka alaabta lagu isticmaalo qalabka adeegsiga sida shaaggaga, tuubooyinka, bateriyada iwm.
- Qalabka adeegsiga qofka la siiyo ayuu gaar u yahay: cid lama amaahin karo, lama kireyn karo, lama sii iibin karo ama siyaabo kale looma iibin karo qalabka adeegsiga.
- Haddii qalabka adeegsiga la xado, dhaawac soo gaaro ama lumo: ashtako ka soo gudbi xaditaanka, lumidda ama dhaawaca soo gaaray qalabka adeegsiga lagu qoray. Markaas kadib ayaa laga yaabaa in lagu qoro qalab cusub. Haddii laga xado, ku wargeli boliiska. Waxaad maamulka gobolka u celineysaa kharashka qalabka la xaday. Waxaad maamulka gobolka u celineysaa kharashka qalabka la xaday ama si uun u lumay. Waxaad maamulka gobolka u celineysaa kharashka qalabka dhaawacu soo gaaray ama si taxadar la'aan ah loogu yeelay dildilaac iyo xoqitaan aan caadi ahayn. Haddaba waxaa lagu la talinayaa in aad iska hubiso caymiska aad ku jirto.
- U guuridda gobolka Östergötland gudahiisa: Adiga ayaa qalabka aad adeegsato u raraya guriga cusub. Marka laga reebo sariir korontok u shaqeysa ama qalab rakiban. Qalabka waxaa xagga ammaanka awgiis soo raraya ciddii laga soo amaahday qalabka. Qofka isticmaala qalabka waxaa lagu soo dallacayaa kharashkii lagu soo raray qalabkaas. Eeg Hjälpmedelsguide cutubka 3.3.
- Kolka gobolka laga guurayo: la xiriir ciddii kuu qortay qalabka adeegsiga si aad u kala ogaato qalabka aad soo celineyso iyo kuwa aad la guureyso oo lagu wareejinayo gobolka cusub. Soo celi dhammaan qalabka adeegsiga oo uusan gobolka cusubi la wareegeyn mas'uuliyaddooda.
- Kolka loo guurayo guryo khaas ah: Adiga ayaa qalabka adeegsiga u celineysa maamulka gobolka, marka qofka loo qoray uu ku talajiro in uu u guuro guri gaar ah oo ku yaal gobolka. Waxaan kuwaas ku jirin qalabka uu maamulka gobolku mas'uul ka yahay kharashkooda oo loogu talagalay guryaha waayeelka ama naafada. Eeg Hjälpmedelsguide cutubka 4.2.

## **Region Östergötland och länets kommuner**

- Soo celinta qalabka adeegsigapmedel: adiga ayaa qalabka adeegsiga u celinaaya marka baahida aad u qabto ay kaa dhammaato ama ay wax iska beddelaan, amase lagaa dalbo. Soo qaadidda qalabka korontada ku shaqeeya oo ay ka mid yihiin sariirta, kursiga curyaanka, kursiga jiifka iyo wiishka waxaa kharashkooda bixinaya maamulka gobolka. Dhammaan qalabkaas adeegsigu waa in ay nadiif ahaadaan marka la soo qaadayo. Maamulka gobolka ayaa mas'ul ka ah oo bixinaya kharashka furfuridda iyo raridda qalabkii adeegsiga oo horay looga soo qaatay maamulka gobolka.